Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu lacnaday laaluush bixiyaha iyo laaluush qaataha waana siman yihiin xaga xukunka

Abii Hureyra Allaha ka raali ahaadee waxaa laga wariyey inuu yiri: Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu lacnaday laaluush bixiyaha iyo laaluush qaataha waana siman yihiin xaga xukunka.

[Xadiis Saxiix ah] [Waxaa wariyay At-tirmidi iyo Axmed]

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu ku habaaray in Ilaahay naxariistiisa ka dheereeyo kan laaluushka bixiya, kan qaata, iyo kan u kala qaada. Ariinkaa waxaa la mid ah waxa la siiyo gar-soorayaasha si ay cadaalada uga leexdaan xukunka ay faraha ku hayaan, taasoo kan dhiibaya laaluushku uu ku helayo muraadkiisa si aan xaq ahayn.

http://sunnah.global/hadeeth/so/show/64689